

Alberta waxay ballaadhisay deeqda habka soo celinta cadaaladda

Maarso 27, 2026

Ururo ku kala baahsan gobolka Alberta ayaa helaya deeqo si kor loogu qaado barnaamijyada habka cadaaladda.

Miisaniyadda 2026 waxay ku maalgalinaysaa \$1.3 miyan hindiseyaasha soo celinta cadaaladda, kuwaas oo ay ka mid tahay Deeqda Soo Celinta Cadaalada. Iyada oo qayb ka ah habka cadaaladda diirada lagu saaraya toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha, \$720,000 oo maalgelin ah ayaa la siiyay 19 ururada aan faa'iido doonka ahayn, degmooyinka iyo bulshooyinka asalka ah si loo bixiyo dadaallada habka cadaaladda diirada lagu saaraya toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha. Deeqda Soo Celinta Cadaalada ee Alberta waxay taageeraysaa hindisayaasha ciqaabta marinaya dambiilayaasha dhibbanayaashana ka caawinaya inay xaqooda helaan.

"Dowladda Alberta waxay aqoonsan tahay shaqada muhiimka ah ee laga qabanayo bulshooyinka ku nool gobolka oo dhan si loo kobciyo isla xisaabtanka geeddi-socodka caddaaladda. Waxaan ku kalsoonahay in deeqahani ay sii wadi doonaan inay taageeraan natiijooyin wanaagsan iyo isbeddel waara oo loogu talagalay shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka Alberta oo dhan."

Mickey Amery, Wasiirka Cadaaladda ahna Qareenka Guud

Marka ay noqoto sannadka 2025-26, 19 ayaa loo doortay inay helaan deeqda. Deeqaha waa ugu badnaan \$50,000 waana in loo isticmaalaa hawlaha hawlgalka.

"Soo celinta cadaaladdu waxaa diirada lagu saaraya toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha waxay abuurtaa madal loogu talagalay isla xisaabtanka oo ku salaysan bulshada, dhaqanka iyo bogsashada. Barnaamijyadani waxay bixiyaan wadiiqooyin dib loogu xoojinayo xidhiidhkii lalaha kuwa dhibbanayaasha ah iyadoo si wax ku ool ahna loola mucaamalayo wixii dhib ah. Waxaan ku faraxsanahay inaan arko in tiro ururada dadka asalka ahi helaan deeqahan. Dowladda Alberta waxay ku faanaysaa inay taageerto ururada hormuudka ka ah shaqadan, sababtoo ah dadaalkoodu wuxuu ka caawinayaa dadka inay hore ugu socdaan qaab ixtiraamaysa mas'uuliyadda iyo hagaajinta labaduba."

Rajan Sawhney, Wasiirka Xiriirka Dadka Asalka Ah

Habkan cadaalad soo celinta waxa uu baddal uyahay qaabkii maxkamadaha ee rasmiga ahaa waxaana uu ku dhiirrigalinayaa dadka dambiyada loo gaystay, iyadoo ay ka midyihiin labadaba kuwa dhibtu gaadhay iyo kuwa dhibta gaystayba, inay sameeyaan wada hadal qaadaana tallaabooyin ay ku saxayaan dhibtii dhacday. Barnaamijkani wuxuu daboolayaa baahida soo kordhaysay ee loo qaabay habkan soo celinta cadaalada kaasoo baddal u ah nidaamka cadaaladeed ee Alberta islamarkaasina ka yaraynaya culayska maxkamadaha Alberta.

“Maalgalintani waxay muujinaysaa sida at Wasiirka Amery go’an tahay inuu xoojiyo ammaanka bulshada isagoo ka taageeraya dhibbanayaasha inay xaqqooda helaan xallinayana dhibaatooyinka ay ka qabaan dadka asalka ahi la mucaamalka nidaamka cadaaladeed. Native Counselling Services ee Alberta waxay uu qaddarinayaa taageerada iyo hoggaaminta uu wasiirku arrimahan ka sameeyay.”

Marlene Orr, Adeegyada La-talinta Dadka Asalka ah ee Alberta

Xaqiiqooyin kooban

- Dowladda Alberta waxay ballan qaaday \$1.3 milyan si ay u taageerto habka cadaaladda diirada lagu saaraya toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha sannad-maaliyadeedka 2025-26, oo ay ku jiraan:
 - \$720,000 oo loogu talagalay Deeqda Cadaaladda Dib-u-heshiisiinta ee Alberta
 - \$350,000 oo loogu talagalay Deeqda Guddiga Caddaaladda Dhallinyarada
- Codsiyada Deeqda Cadaaladda Dib-u-heshiisiinta ee Alberta waxaa la aqbalay Luulyo iyo Agoosto 2025.
- Ururada soo socda ayaa helaya deeqo:

Ururada fadhigoodu yahay Edmonton

- Ururada ay ku bahooween Nidaamka Maxkammada ku hadla Af-faransiiska
- Ururka Guddiga Caddaaladda Dhallinyarada ee Edmonton
- Adeegyada La-talinta Dadka Asalka ah ee Alberta
- Ururka Guddiga Caddaaladda Dhallinyarada ee Strathcona
- Hay'adda Badbaadada Bulshada ee enCompass

Ururada fadhigoodu yahay Calgary

- Ururka John Howard ee Calgary
- Ururka Horumarinta Dhallinyarada iyo Bulshada ee Synergy
- Golaha Connecting the Dots Diversity (Awooda Isku-xirrida Kala duwanaanshaha) & Golaha ka mid noqoshada
- Mashruuca uTurn Inc.

Ururada fadhigoodu yahay Waqooyiga Alberta

- Qowmiyadaha Koowaad ee Cold Lake
- Ururka Habka Cadaaladda diirada lagu saarayo toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha ee Gobolka Peace River
- Degmo Goboleedka Wood Buffalo

Ururada fadhigoodu yahay Bartamaha Alberta

- Ururka Open Doors ee Camrose
- Camrose & Ururka Adeegyada Taageerada Qoyska iyo Bulshada ee Degmada
- Ururka Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Hinton
- Ururka Habka Cadaaladda diirada lagu saarayo toosinta bedelkii laga ciqaabi lahaa dambiilaha ee Innisfail
- Magaalada Drayton Valley



War saxaafadeed

Ururada fadhigoodu yahay Koonfurta Alberta

- Xarunta Ku-xadgudubka Galmada ee Chinook
- Isbahaysiga Dhalinyarada ee Sweetgrass

Macluumaadka la xiriira

- [Deeqda Cadaaladda Dib-u-heshiisiinta ee Alberta](#)

Su'aalaha warbaahinta

Heather Jenkins

Heather.Jenkins@gov.ab.ca

780-245-0421

Xoghayaha Saxaafadda, Caddaaladda